Erey bixin

Sharrax ereyada

1.**xuurto:**qofka aad u orday ee xoog udaalay/neef tuur

2.**jibaal:**labaatan talaab oo afar gees ah

3.**moosid:**sameynta jibaalka oo ah kolka dhulka la kala xirayo

4.**tacab:**toban talaabo oo balac ah iyo sodon talaabo oo dherer ah qaab laydhi ah

5.**geed qaad:g**eeda goyska lagu sameeyo aagga labeerayo

6.**kawaawe:**ul dheer oo hoosta lagaga xiro bir ballaaran iyo xarrig labada gees ah oo beerta lagaga celiyo biyaha badan iyo bacaadka oo dhulka lagu mooso

7.**miige:**ul madax ballaaran oo dhulka lagu qodo kolka beerta la abuurayo

8.**jaan:**cowska ama dhirta yar yar ee beerta laga guro kolka falayo,haramo

9.**biqil:**kolka miraha abuurka ahi bixid bilaabaan

10.**waraf:**xarig dhexda u balaaran oo leh labo lugood ,dhagax ama bur carro ah ayaa lagu tuuraa

11.**alan:**xubinta laanta balka ee baxeysa

12.**qaran:**laanta mesegada ee galleyda

13.**bal:**geedka galleyda iyo mesegada laamaha iyo caleenta

14.**sabuul:**miraha mesegada ama galleyda marka ay ku yaalaan jafka

15.**karoor:**goobta lagu aruururiyo sabuulka

16.**sumac:**marka mesegada ama galleyda lagu tumo si miraha loo daadiyo

17.**barooro:**soo bixidda sabuulka

18.**jareero:**sabuulka kolka uu timaha yeesho caaneeyo

19.**hoobade:**kolkii sabuulka la taabto ee mirihiisu daataan

20.**waago:**qashinka miraha laga bixiyo

21.**boqon dhow:**kolka lunka laga jaro jiridda ka hor

22.**kabaay:**bal isku xiran

23.**tubid:**kolka balka la is taajiyo oo madaxa la isu geliyo

24.**bakeeti:**kolka balka la jiifiyo oo madaxa la isu geliyo

25.**bakaar:**godka badarka lagu kaydsado

26.**hoole:**bir yar oo loogu hoolo yaanbada oo carrada lagaga xoqo

27.**dhacle:**xarig madax bulay ah leh oo bixiyo dhawaaq dheer shimbiruhu ka didaan

28.**raar:**dhirta waaweyn ee beerta dhextaal baa dushooda lagu sameynayaa rako oo geedka korkiisa laga waabayo

29.**kashiishad:**soorta laga sameeyo galleyda ama mesegada

30.**bukureey:**geed cagaar ah oo inta la kariyo lagu cuno soorta ama wax yaabaha kale

31.majabe: geed jilicsan oo lagu dhiso mudullada iyo boodadka
32.hantool:naxash
33.hanfariir:waa kala did baqdani ku jirto oo lakala ordayo
34.hanfi:dabayl kulul oo wax leefta oo ka timaada cadceeda iyo walxaha macdanta
35.hangal:asay ama hengel ama hengesh oo ah dhar dumar ku xirtaan kolka laga dhinto
36.haniye:xididka dhiiga jirka ka soo noqday wadnaha keena
37.hanbo: weelka wax lagu cuno ama lagu cabo inta ku harta
38.hanaan:maarayn suuban oo qofka hankiisa ku fadhido
39.hanqar:codka ay sameeyaan hilaaca iyo onkodka wada socda
40.hanqal:oogada dadka ee qaaxada ka sareysa laga bilaabo karaysimaha ilaa madaxa
41.hanqalaal:daloolka u dhaxeeya dhuunta sanka iyo afka ama sanqada

Maahmaah

1.kuu sheekeeye kaa sheekeeye lalama sheekeysto
2.lahel lahel lawaa baa xigta
3.la jiifiyaana banaan la joojiyaana banaan
4.laafyo aadan u dhalan lix saamood ma dhaafto
5.laanta toosi intey curdin tahay
6.labo aanan isku waramin ma walaalowdo
7.labo biyood oo hoosta iska haraantiyay iyagaa iska kaa og
8.labo biyoo kulul isma qaboojiyaa

Ereyga	lidkiisa	E.kle oo la micno ah
1.raaxo	rafaad	nasiino/nolol wacan
2.Shilis	caato	buuran/cayiilan
3.riman	dhalay	uur/xaamilo
4.irmaan	guran	neef caano leh
5.hebed	oogo	Baari
6.guban	raysin	dhul xeebeed kulul
7.dhimo	noolow	geeri/go
8.burcad	baqbeeno	bocor
9.ugub	curad	cusub
10.kadin	tood/toojo	irid/ilin

Erey macno badan	tirada macnayaasha
1.maag	daandaansi/gardarro
2.maal	xoolo/ hanti/neef irmaan in lasoo liso
3.maamuus	wanaajin/karaameyn
4.maan	caqli/garaad/garasho
5.maar	macdan
6.maax	biyaha habiinka ceel ku jira/biyo badan
7.mac	dhunkasho
8.maqal	ubadka ariga /dareenka dhagaha

9.mase siman

10.mowjad hir/qulqul

Suaalo iyo jawaabo

1.kee baa gardaran hadii ay garsoor kuu dhiibtaan nin beeraley ah iyo nin xoolaley ah iyaga oo isku haysta beerteyda ayey xoolihiisu iga daaqeen xoolaha ma anigaa ari beerta soo daaqa?

- Waxaa gardan ninka xoolaha iska leh waayo waxey kala yihiin socoto iyo masocoto xooluhu waa socoto lkn beerta waa loo yimid sidaa darteed waxa gardaran ninka xoolaha iska leh

2.sidee dhaqanka soomaalida uga turjumayaa waxa dhexmaray xirsi iyo oday geedi?

- Waxa ay ka turjumeysaa in soomaalidu ay uqeyb samaan kuwo xoolaleey ah iyo kuwo beeraleey ah sidaa darteed beerelaydu waxey leedahay dhaqamo kala duwan waayo beeraha qaar waxaa lagu falaa dibiyo kuwo kalane waxaa lagu falaa yaanbo sidoo kale dhaqamada beeraha waxaa kamid ah in ay beeraha qaar ay waraab ka helaan wabiyada kuwo kalane ay sugaan xilliyada roobka iyo kuwi lagu waraabiyo ceel biyood

3.sidee buu uga faaiiday xirsi safarkii uu ku tagay tuulada oday geedow sharrax ka bixi?

- Wuxuu kasoo faa,iiday wuxuu soo qaatay cashiro ku saabsan sida beeraha loo tabcado sidoo kale waxaa lasoo siiyay agabka beeraha lagu falo

4.sharrax ka bixi sida deegaanka looga tabcado beeraha adiga oo u barbardhigaya habkii loogu sharraxay xirsi?

- Deegaankeena beeraha waxaa loo tabcadaa sida tan marka hore waa in la cabiraa dhulka,waana lageed qaadaa sidoo kale waa caragediyaa kadib jibaal jibaal ayaa loo sameeyaa kadib waxaa dhulka beerta lagu duugaa abuurka

5.dhaqaalaha soomaaliya kee baa u wanaagsan beerashada iyo xoolo dhaqashada?sharrax ka bixi adiga oo is barbardhigaaya labadooda?

- Dhaqaalaha soomaaliya waxaa ugu wanaagsan xoolaha waayo xoolaha soomaaliya badanaa waxaa loo dhoofiyaa dibada dhaqaalo badan ayaa laga helaaa laakiin hadii aan is barbar dhigno beerashada iyo xoolo dhaqashada qoys walbo oo soomaaliyeed waxa uu dhaqdaa xoolo xitaa hadii uu beer lee yahay,laakiin inta beeraha falata aad beey u yar yihiin

6.gobolladee ugu badan tabcashada beeraha?maxaase ugu wacan?

- Gobollada ugu badan tabcashada beeraha waxaa ubadan labada shabeelle(shabellada hoose iyo shabellada dhaxe)waxaana ugu wacan webiyada mara dalkeena.

7.xaggee ugu badan soomaaliya ee laga soo saaraa bardhada?

- Bardhada waxaa laga soo saaraa gobollada hiiraan gaar ahaan baladweyne

8.sidee ugu fiican ee beer lagu tabcan karaa meelaha aan wabiyada marin?

- Meelaha aan webiyada marin beeraha waxaa loogu tabcan karaa in ceel la qodo kadibna matoor la saaro sidaana lagu waraabiyo ama xilliyada roobabka la sugo

9.muxuu yahay dalaga ugu badan ee soomaaliya laga soo saaro?

- Dalagga ugu badan ee soomaaliya waxaa kamida :galleyda digirta iyo sisinta i.w.m waxaana laga soo saaraa labada shabeelle

10.waa maxaay iniin ama shinni ?

- Iniin ama shinni Waxaa la yiraahdaa miraha beerta lagu abuuro

Diyaarin:fardowsa macalin cabdi(aragsan)